TILMAANTA BUKAANKA SAWIRKA BAARISTA KLIINIKADA MANKATO

# ULTRA SOUNDKA SIMANKA

Pelvic Ultrasound - Somali

Bukaanka: ______________________________________________________________

Taariikhda Ballanka: ____________ Waqtiga Imaashada: _________________ am/pm

Goobta: Waaxda Sawirka Baarista Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

**Maxuu yahaay Ultrasoundka Simanka**

Ultrasoundka simanka wuxuu adeegsadaa hiirarka dhawaaqa, ma adeegsado shucaaca, iyo qalab lagu magacaabo "transducer" si loo helo sawirada xubnaha ku jira gudaha simanka.

## Baarista Ka Hor

- Ma jirto cunto kaa reeban xagga baaristaan.
- **Dhamaystir cabbitaanka 32-40 waqiyad oo biyo ah hal saac KA HOR waqtiga loo qabtay baarista.**
- Fadlan iska ilaali cabbitaanka xumbada soo saara. Waa la ogol yahay in aad bar ka bar ku baddashid qiyaas juus ah ama qaxwo.
- Waxaa loo baahan yahay kaadi hayn buuxda si loo fulliyo baarista. **HA** faaruqin kaadi haynta ilaa laga dhamaystiro baarista.
- In aad soo daahdid ama in aadan raacin tilmaamaha diyaarinta kore waxay dhalin doontaa in ballan kale loo qabto baarista.

## Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad dharka iska dhigtid. Waxaa lagu siin doonaa goono.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku seexatid sariir.
- Baaristaan waxay qaadan kartaa ilaa 60 daqiiqo si loo dhamaystiro.
- Burcad diiran ayaa lagaa saari doonaa qeybta simanka.
- Qalabka "transducer" ayaa la marmari doonaa qeybta simankaada inta ay socoto baarista, waxaana dhici karto in cadaadis la saaro si loo hagaajiyo tayada sawirka.
- **Bukaanka dumarka:** Waxaa kaloo loo baahan karaa in la adeegsado qalabka la geliyo siilka. Tan waxay u baahan tahay in qalabka ultrasoundka la geliyo siilkaada si loo arko gudaha sida ay u samaysan yahiin simanka. Baarista waxaa la fullin karaa waqtiga caadada. Qalabka dhawaaqa (sonographer) wuxuu kuu ogolaan doonaa in aad faaruqisid kaadi hayntaada ka hor inta aan la galin baarista gudaha siilka.
- Qalabka dhawaaqa (sonographer) wuxuu qaadi doonaa dhowr sawir.
- Sawiradaada waxaa fiirin doono, waxaan akhrin doono aqoonyaanka qalabka shucaaca.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbay baarista.

## Baarista Kaddib:

- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Waa la fiirin doonaa baaristaada, waxaana akhrin doono aqoonyaanka Raajada 24ta saac xigta gudaheeda. Waxaa warbixin loo diri doonaa bixiyehaada si uu u fiiriyo. Bixiyehaada wuxuu mas'uul ka yahay in uu kuu soo gudbiyo natiijadaha, waxaana laguu soo diri doonaa warqad, telefoon, ama waxaa lagu siin doonaa ballan si laguula socdo. Haddii aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8570.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**

**MC1754SO (rev 11.13)**